

Taageeridda ardayda naafada ah

Sibtambar 12, 2023 [Weydiimaha saxaafadda](#)

Dawladda Alberta waxay ku maalgalinaysaa \$5 milyan sanad dugsiyeedka 2023-24 si ay u taageerto ardayda qabta naafooyinka naadirka ah.

Naafooyinka naadirka ah waxay saameeyaan qiyaastii 7,500 oo arday Alberta, ama qiyaastii boqolkiiba hal ardayda oo dhan, waxaana ku jira ardayda indhoolaha ah ama kuwa araggoodu liito, kuwa dhagaha la' ama maqalku ku adag yahay, kuwa maqalka iyo aragga la', ama kuwa qaba baahiyaha dhanka xiriirka ee kakan.

Maalgalinta Taageerooyinka iyo Adeegyada Naadirka ah (LISS) waxay u saamaxdaa maamulada dugsiyada inay qaataan oo ay tababaraan xirfadlayaal takhasus leh oo ay siiyaan qalab iyo khayraad waxbarasho, taasi oo yaraysa kharashka badan ee teknoolojiyadda iyo adeegyada qaaliga ah ee ardayda qaar u baahan yihiin si ay si buuxda waxbarashada ugu helaan.

"Markay maalgalintan helaan, dugsiyadu waxay awoodi doonaan inay qaataan khubaro dheeraad ah si ay u caawiyaan ardayda qaba naafooyinka naadirka ah. Dawladda maxaafidka midoobay ee Alberta waxay aad u rumaysan tahay ilaalinta iyo taageeridda ardaydeena nugul. Maalgalintan darteed, dugsiyadu waxay awood u heli doonaan inay daboolaan kharashka adeegyada iyo qalabka loo baahan yahay si loo caawiyo kuwa indhaha la', kuwa aragga liita, kuwa dhagaha la', kuwa dhagaha iyo maqalka la' ama kuwa qaba baahiyaha dhanka xiriirka ee kakan."

Demetrios Nicolaidis, Wasiirka Waxbarashada

Iyadoo aanu garawsannahay baahiyaha kala duwan ee ardayda Alberta, iyo si aanu u xaqiijinino in maalgalintan loo adeegsado halka loogu baahida badan yahay, maalgalinta waxa loo siin doonaa si toos ah guddiyada dugsiyada ee dadwaynaha iyo kuwa gaarka ah, dugsiyada caqdiga ee dadweynaha (public charter schools) iyo maamulada mandaqadeed ee afka faransiiska looga hadlo kuwaasi oo aqoonsada baahida loo qabo taageerooyin dheeraad ah. Maalgalinta loogu talo galay maamul dugsi oo kasta waxay ku xirnaan doontaa tirada ardayda

ee buuxiya shuruudaha mutaysiga iyo goobaha maamulada dugsiyadu ku yaalaan si loo xaqiijyo maalgalin habboon in la siiyo mandaqadaha baadiyaha iyo meelaha fogfog.

Xaqiiqooyinka kooban

- *Xeerka Waxbarashadu* wuxuu dhigayaa in maamulada dugsiyadu ay ogaadaan ardayda qaba naafooyinka naadirka ah oo ay siiyaan taageerooyinka daruuriga u ah ee ay ugu baahan yihiin ardaydu waxbarashadooda.
- Maalgalinta LISS waxa la socota deeqda Taageerada Waxbarashada Khaaska ah oo la siinayo dhammaan maamulada dugsiyada, taasi oo ka caawisa daboolidda baahiyaha kala duwan ee carruurta dhigata dugsiyada.
- Tusaalayaasha kharashaadka mutaysanaya in la daboolo:
 - Adeegyada ay bixiyaan kooxda waxbarashada dugsiyada ee ardayga, oo ay ka mid noqon karaan:
 - macallimiinta dadka dhagaha la' iyo kuwa maqalku ku adag yahay
 - macallimiinta indhoolaha iyo dadka araggoodu liito
 - khubarada waxbarasho ee maqalka (educational audiologists)
 - tarjumaanada luuqadda dhagoolaha
 - khubarada hanuuninta iyo dhaqdhaqaaqa (orientation and mobility specialists)
 - kaaliyayaasha farta indhoolaha
 - baxnaaniyayaasha shaqada jirka (occupational therapists)
 - khubarada xiriirka aan hadalka ahayn iyo xiriirka baddiilka ah (augmentative and alternative communication specialists)
 - dhakhaatiirta daawaynta xanuunada hadalka la xidhiidha (speech language pathologists)
 - khubarada Cilmunafsiyada
 - Teknoolojiyadda, khayraadka, agabka dadka kaalmeeya iyo wax-ka-baddalka bii'adda si loo daboolo baahiyaha helitaanka waxbarasho ee ardayga u gaarka ah.
 - Kobcinta xirfadeed, tabobar, aqoon-korodhsiyo iyo shirar waafaqsan baahiyaha tabobar ee shaqaalaha takhasuska ah ee sida tooska ah u taageera ardayda leh naafooyinka naadirka ah.

Wararka la Xiriira

- [Maalgalin dheeraad ah oo loogu talagalay ardayda naafada ah](#) (Feb.1,2023)